



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 8aad	Kulanka: 10aad
Taariikhda: 17 Oktoobar, 2026	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:34 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:10 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi.	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: 1.Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalka Cimilada Xildhibaan Wasiir Bashiir Goobe. 2. Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka Mudane Xasan Macalin Maxamuud.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka 2. Anxisixnta Ajendaha 3. Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Saadaasha Hawada. 4. Akhrinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka Iskaashiga Garsoorka. 5. Akhrinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka Hay'adda Qaran ee Maaraynta Deegaanka.

Furitaanka Kulanka:

Senator Cabdiraxmaan Barre Cusmaan ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan ajendayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 27**Ka aamusay: Majirin****Diidmo: Majirin****Nuxurka Kulanka:**

Gudoomiyaha Golaha Aqalka sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Xoghaya Guddigga Kheyraadka Qaranka Kaabayasha Dhaqaalaha Aqalka Sare Senator Zamzam Daahir Maxamuud si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Saadaasha Hawada. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa cod geliyey Ansixinta Hindise Sharciyeedka Macdanta JFS waxay u dhacday sidan:

Oggol: 27**Ka aamusay: Majirin****Diidmo: Majirin**

Ansixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka Mudane Xasan Macalin Maxamuud, si uu Golaha ugu hor akhriyo warbixinta akhrinta 1aad ee Hindise-sharciyeedka Iskaashiga Garsoorka Caalamiga ah. Sido kale Gudoomiyaha Golaha Aqalka ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo Isbadalka Cimilada ee XFS, Mudane Bashiir Maxamed Jamac, si uu Golaha uga hor akhriyo warbixinta akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Qaran ee Maareynta Deegaanka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dhismaha Hay'adda Saadaasha Hawada.
3. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi, ayaa faray Xoghayaha ku-xigeenka Golaha ahna ku-simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare in Hindise-Sharciyeedyada loo gudbiyo guddiyada ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibaadkooda una soo diyaariyaan warbixinnada akhrinta labaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray, Saacaddu markay ahayd, **12:10 PM.**

DHAMAAD